

Tallada waalidinta ee COVID-19 Hawlgalka dugsiyada ee *Greater Sydney

Wasaaradda Waxbarashada ee NSW iyo NSW Health waxay ka wada shaqeynayaan inay ka jawaabaan COVID-19.

Iyadoo la raacayo tallada NSW Health guriga wax ku barashadu waa u jiraa dugsiyada *Greater Sydney (oo ay ku jiraan Blue Mountains, Central Coast, Wollongong iyo Shellharbour). Dugsiyadu waa u furan yihiin dhammaan ardeyda u baahan. Haddii ardey ama waalid ama ilmo uu xitaa leeyahay astaamaha ugu yar ee COVID-19 ([COVID-19 symptoms](#)) waa inaysan dugsiyada iman waana inaysan dugsiyada ku soo noqon ilaa inay helaan natiijo baaritaan oo aan laga helin xannuunka oo aysan lahayn wax astaamo ah.

Maaskarada iyo weji daboolka

Inta dugsiyada lagu jiro maaskarada ama weji daboolka waa layska rabaa dhammaan dhismaha dhexdooda ee:

- dhammaan ardeyda Fasalka 7aad iyo ka kore
- dhammaan shaqaalaha.

Qaar baan laga soo reebayaa xeerarkan, fadlan tixraac xeerarka maaskarada wejiga ee website ka Dawlada NSW ([Face mask rules on the NSW Government website](#)) wixii macluumaad dheeraad ah.

Dadka booqashada ah

Dadka booqashada ee aan lagama maarmaanka ahayn looma ogola goobaha dugsiyada.

Xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta waa inay raacaan tallada dugsiyada ee la xiriirta isbedelada keenida iyo qaadida ardeyda. Tan waxaa ku jira ku jirida gaariga markaad dhigeysid ama qaadaysid carruurta haddii ay amaan tahay in sidaa la sameeyo. Tani ma khuseyso keenista iyo qaadista Daryeelka Saacadaha Dugsiyada ka baxsan (Out of School Hours Care (OOSHC)) maadaama nidaamka saxiixa soogelitaanka iyo bixitaanka loo baahan yahay.

Waalidiintu waa inay:

- raacaan tallada kala fogaanta ee goobta degaankooda iskana ilaali ku ururka bannaanka deyrka dugsiyada
- Bannaanka ka joog gudaha dugsiyada - waxaa laga yaabaa inay jiraan qaar laga soo reebayo dugsiyada ujeedooyinka khaaska ah (Schools for Specific Purposes (SSP)), ardeyda nugul ama ardeyda baahiyaha gaarka ah qaba
- Ku dhaqan in layska doonayo xirashada maaskarada oo isticmaal saxiixida Service NSW QR code markaad dugsiyada soo galeysid.

Ardeyda HSC

Ardeyda HSC waa la taageeri doonaa si ay u yimaadaan dugsiyada oo ay sameeyaan shaqada kooraska, shaqada mashruuca iyo diyaarinta imtixaanka meeshii aan tan lagu sameyn karin guriga. Ardeyda yimaada waxaa looga baahan doonaa inay ku dhaqmaan waxqabadka COVID ka oo amaan adag leh.

Adeega Turjubaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan wac maamulaha dugsiyada. Haddii aad u baahan tahay turjubaan kaa caawiya weydiintaada fadlan wac Adeegga Turjubaanka Taleefanka 131 450 oo ku weydiiso turjubaanka luuqadaada. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.